

# SIDA LOOLA DHAQMO OGEYSIISKA GURI KA-SAARIDA



**DENVER**  
THE MILE HIGH CITY

## Joojinta/Ka-saaridda Oggolaansho-La'aanta Ah

### KA SAARIDDA GUUD AHAANEED

- Ka saariddu waa marka kireystaha maxkamadi amarto inuu ka baxo milkiyadda. Kaliya booliska (sheriff) ayaa fulin kara amarkan maxkamadeed, oo guri-kireeyayaasha ayaan weligood ka-saari karin qofkna guriga amar maxkamadeed iyo boolis la'aan. *Ogsoonaw: Magaalada Denver, wakiillada madaxa boliiska (deputy sheriffs) ayaa fuliya ka-saaridda. Noocan ficilka sharciyeed ah ayaa loo yaqaan loogu yeeraa Xoog Ugu Soogalid iyo Ku Haysasho Qasbban (FED).*
- Mulkiileyaasha ayaan sharci ahaan u diidi karin kiraystayaasha inay galaan mulkiyadda, beddelaan qofulka, ama ka saaraan wayaabaha u leeyaha kiraystuhu amar maxkamadeed la'aan.
- Haddii kiraystuhu uusan bixin kirada ama uu jabiyo shuruudaha heshiiska kirada, kireeyuhu waa inuu siiyaa kireystaha Weyddiisiga Tobanka-Maalmood ee loogu talagalay Adeeca ama La Wareegga (Weyddiisiga Tobanka-Maalmood) oo sheegaya kirada lagu leeyahay ama tilmaamaan jebinta heshiiska kirada si loo bilaabo habsocodka FED. Kireystaha ayaa bixin kara kirada haddii kiro lagu leeyahay, oo sixi kara xadgudubka, oo kaga bixi kara toban maalmood gudahood, ama wuu kaga doodi kara ka-saaridda garsoore hortiisa maxkamadda. Haddii kiraystaha kaga doodo lacagta lagu leeyahay weyddiisiga, oo kiraystuhu u ku bixiyaa inta saxda ah muddada tobanka maalmood ah. Mulkiiluhu qasab kuma aha inuu aqbaloo lacag bixinta kaddib muddada tobanka maalmood ah.
- Mulkiilaha ayaa siin kara kiraystaha Weyddiisiga Tobanka-Maalmood iyaga oo ugaga taga nuqul meesha caadiga ugu ah hoy ahaan kiraystaha, iyo qof kasta oo da'diisu tahay siddeed iyo toban sano ama ka wayn oo xubin ka ah qoyska qofka, ama qofka meesha shaqadiisa caadiga ah, ama kormeeraha, xoghayaha, kaaliyaha maamulka, xisaabiyaha, wakiilka kheyraadka shaqada iyo shaqaalaha ama wakiilka maamulka; ama iyada oo lagu dhajiyo meel muuqata milkiyadda, sida albaabka hore, haddii aad loogu dadaalay in shaqasi ahaan loo siiyo. Tobanka maalmood ayaa ka bilaabmaya maalinta helitaanka ogeysiiska ama meel ku dhajinta, xitaa haddii kiraystuhu uusan marnaba arkin ogeysiiska. Tobanka maalmood ayaa ka bilaabmaya maalinta helitaanka ogeysiiska ama meel ku dhajinta, xitaa haddii kiraystuhu uusan marnaba arkin ogeysiiska.
- Haddii kireystaha uusan bixin, ama sixin xadgudubka, ama guurin, markaa kireeyuhu wuxuu xereyn karaa dacwad guri ka-saarid ah. Talaabooyinka ku lug leh habsocodka waxaa lagu faahfaahiyay Shaxda Habsocodka Ka-Saaridda Guriga ee Denver ee lagu lifaaqay.
- Shuruudaha Weyddiisiga Tobanka-Maalmood ayaa marwalba khuseeya arrinta, xitaa haddii waxa ku qoran heshiiska kiradu ay si kale u u sheegayo.

#### Talooyinka Kireystayaasha

Isla markaad milkiilahaaga aad ka hesho Ogeysiiska Tobanka Maalmood ee guri ka-saarid, la xiriir Office of Financial Empowerment and Protection (Xafiiska Awooddaynta iyo Difaaca Dhaqaaleed). adoo wacaya 720-944-2498 ama iimayl u dira [FEC@denvergov.org](mailto:FEC@denvergov.org). Waxa lagugu xidhi doonaa hage kuu tilmaami kara:

- Ka caawinta kirada
- Adeegga Sharciga
- Adeegyada dhexdhexaadin
- Adeegyada kale ee laga heli karo iyada oo loo maro hay'adaha dawladda hoose iyo kuwa aan macaash doonka ahayn

### QAABSOCODKA KA-SAARIDDA

- Haddii Weyddiisiga Tobanka-Maalmood la bixiyo oo kireystuhu u ka sohorjeedsado eedeymaha, kiraystaha ayaa la xiriiri kara milkiilaha, (Adeegyada Sharciga Kolorado) ([coloradolegalservices.org](http://coloradolegalservices.org), 303-837-1313), ama Community Mediation Concepts (Fikradaha Dhexdhexaadinta Bulshada) ([CMC@FindSolutions.org](http://CMC@FindSolutions.org), 303-717-4151) si iskugu daydo inuu xalliyo arrinta. Ka eeg qaybta ilha wixii


faahfaahin dheeraad ah.

- Marka la xereeyo dacwada guri ka-saaridd mulkiiluhu waa inuu siyaa nuqul ah Cabashada iyo u eerista ah kiraystaha. U yeeritaanka ayaa u wargalin doona kireystaha in isaga ama iyadu ay hor yimaadaan maxkamad taariikh iyo waqti cayiman. Tilmaamaha hor-imaadka fog ee Maxkamadda Denver County waa in la raaciyaa u yeeritaannada.
- Taariikhda hor imaadka, kireystaha ayaa inuu xereeyo jawaab ama uu heshiis qoraal ah la galo kireeyaha oomarka lagu xareeyo maxkamadda taariikhdaas. Haddii kiraystuhu aanu samayn labadaas wax midkood, xukun ugu talagal oo ah kala wareeg (xukunka ka-saarida) ayaa si toos ah lagu qaadyaa kiraystaha.
- Haddii kiraystuhu uu doonayo inuu xereysto jawaab laakiin uusan awoodin khidmadda xereynta (qiyaastii \$100), kireystuhu wuxuu weyddiisan karaa karraaniga maxkamadda foomka inuu aqbalo jawaabta ah bilaa kidmad xereynta.
- Haddii u kireystuhu xereeyo jawaab, taariikh kiiska la qaado ayaa lagu qaban doonaa ugu yaraan toddoba (7) maalmood.
- Haddii amarka ka-saaridda lagu helo maxkamadda, kireeyuhu waa inuu la xiriiro wakiilka shariifka si uu ula socdo ka-saaridda. Sida hoos timaad sharciga Gobolka guuleystaha dacwada ka-saaridda ayaa laga yabaa inuu ka helo karo khidmadaha qareenka iyo kharashaadka dacwada oo macquula dhinaca kale ee dacwada haddii u oggol yahay heshiiska kiradu.
- Mulkiileyaasha kama saari karaan kiraystayaasha ama kama hor istaagi karaan kiraystuhu inuu soo galo milkiyadda bilaa amar maxkamadeed iyo ku wakiil shariif. Gacan u qaadka ama cabsigalinta waa in loo soo wargeliyaa booliska. Haddii ay dhacdo ka xiritaan guri, waxaa ugu wanaagsan in aanu kireystuhu istcimaalin xoog si u dib ugu soo galo guriga oo isla markaana u la tashado Colorado Legal Services ama qareen.

#### **KU XADGUDUBYADA AMA KU CELCELINTOODA BADAN EE HESHIISKA**

- Haddii u kiraystaha jebiyu heshiiska kirada marar badanoo horena loo siiyey Weyddiisiga Tobanka-Maalmood, ama ay jiraan xadgudubyo aad u daran oo ah sida gacan u qaadid ama daroogo, mulkiilaha ayaa dhejin kara ama siin kara “Ogaysiin Ka Bixidda”, taas oo aan siinayn kiraystaha fursad lagu saxo xadgudubka. Taa baddalkeeda kiraystaha ayaa ah inuu kaga baxo guriga muddo seddex-maalmood gudahood ah xadgudub wayni markuu jiro, toban maalmood xadgudub soo nqonoqda, ama uu kaga doodo ka saarista maxkamadda horteeda garsooraha.
- Mulkiileyaashu wey mamnuuci karaan isticmaalka daroogada sharci darrada ah ee kiraystaha gudaha milkiyadda oo ay ku jiraan maariwaanda madaddaalo ama ta caafimaadka.
- Guud ahaan, dhibbanayaasha gacan ugu qaadka guriga lagama saari karo sababo la xiriira gacan ugu qaadka guriga awgood. Caddayn boolis ama amar badbaado madani ayaa loogu baahan karaa gacan ugu qaadka guriga si ay difaac ugu noqoto guri ka saarista.
- Habka kaliya ee kireeyuhu uu uga takhalusi karo heshiis oo u ka saari karo kirayste nooc kasta oo milkiyad kiro ha ahaatee waa iyada oo loo maro ficilka sharciga Soogalid iyo Ku Haysasho Qasbban(FED) si loo helo amar maxkamadeed oo uga baahan kiraystuhu inuu ka baxo milkiyadda. Marnaba sharci ma aha inuu mulkiile guri uu ka saaro kireyste amar maxkamadeed la'aan.
- Muddada Ogeysiiska Ka Bixidda ayaa ah 3, 21, 28, ama 91 maalmood, iyadoo kux iran dhererka kiraysi iyo inta ogeysiis ee ku jirta heshiiska kirada. (Xeerarka Sharciga Dib Loogu Noqday ee Colorado 13-40-107.)
- Qoysaska soo haajirayaasha ah iyo kuwa aan sharciga lahayn ayaa leh difaaca iyo xuquuqaha kiraystaha sida Dammaan
- Mulkiilaha guriga iyo kireysteaha ayaa lheshiis gaari kara, ama xallin kara kiiska, halkii ay ka aadi lahaayeen dacwad u gar qaaditaan.
- Xitaa haddii kireystahaa looga adkaado gar qaadka maxkamadda, kireeyaha iyo kireystaha ayaa wali heshiin kara kahor inta uusan ku wakiilka shariifku u iman ka-saaridda. Heshiiskan oo kale waa inuu ahaadaa mid qoraal ah.

# Jadwalka Ciqaabta



■ Ficilka Kireystaha

■ Ficilka Mulkiilaha

\*\*La xiriir Xafiiska Awooddaynta iyo Dhaqaaleed iyo Difaaca taageero iyo u diritaanka ilaha ku habboon adoo wacaya **720-944-2498** ama iimayl [u.dira.FEC@denvergov.org](mailto:u.dira.FEC@denvergov.org).

# Ilaha loogu talagalay Deggenayaasha Denver ee Ay Soo Wajaheen Ka-Saariddu

<p><b>XAFIISKA DENVER EE AWOODDAYNTA IYO DIFAACA DHAQAALEED, QAYBTA DIFAACA DHAQAALEED EE MACAAMIISHA (DENVER OFFICE OF FINANCIAL EMPOWERMENT AND PROTECTION, CONSUMER FINANCIAL PROTECTION UNIT)</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• U adeegida shaqsiyaadka, qoysaska iyo meheradha yaryar</li> <li>• Adeegyada Tilmaamaha</li> <li>• Tababbaritaan lacag la'aan ah oo qof-ka-qof ah</li> <li>• Difaaca dhaqaaleed ee macaamiisha (wax ka qabashada khayaanada dhaqaaleed iyo dhiirrigelinta ku dhaqanknada guriyaynta cadaaladda ah)</li> <li>• Maaraynta deynta</li> <li>• Hubinta deynta</li> </ul>	<p>720-944-2498</p> <p>limayl ugu dir <a href="mailto:FEC@denvergov.org">FEC@denvergov.org</a> ku tababbarinka dhaqaaleed.</p> <p>limayl u dir <a href="mailto:cfpd@denvergov.org">cfpd@denvergov.org</a> si aad u hesho tilaamo ama taageerada maaliyadeed ee macaamiisha.</p>
<p><b>DENVER DEPARTMENT OF HOUSING STABILITY (WAAXDA XASILOONAATA GURIYAYNTA DENVER) (HOST)</b></p> <p>HOST ayaa bixisa ilaha lagu caawiyo degganayaasha Denver:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Raadin guri cusub</li> <li>• Ku jirid guriga hadda</li> <li>• Helid hoy</li> <li>• Bixi Kirada, biilasha biyaha iyo koranta iwm. iyo moorgeejka</li> <li>• Fahmaan nidaamka la wareegida iyo ka-saaridda</li> </ul> <p>Intaa waxaa sii dheer, HOST ayaa maamusha <b>barnaamijka KA CAAWINTA KIRADA IYO YUTILITIGA KU MEELGAARKA AH (TEMPORARY RENT AND UTILITY ASSISTANCE) (TRUA)</b>. Ka Caawinta Kirada iyo Yutilitiga (nalka, biyaha iwm.) ee laga helo Waaxda Xasilloonaanta Guriyaynta ayaa ka caawisa degganayaasha Magaalada iyo Deegaanka (County) Denver ee ay soo wajaahan dhibaato dhaqaaleed iyo si looga hortago ka-saaridda guriga ama ka daminta nalka iyo waxa la midka ah (utility). Haddii aad ugu baahan tahay caawimo bixinta kirada ama yutilitiga waxa laga yaabaa inaad uqalanto inaad inaad hesho caawimo ku meel gaar ah.</p>	<p><a href="https://denvergov.org/Housing">Denvergov.org/Housing</a></p> <p>720-913-1534</p> <p><a href="mailto:housingstability@denvergov.org">housingstability@denvergov.org</a></p>
<p><b>ADEEGYADA DADWAYNAHA DENVER</b></p> <p>Denver Human Services (Adeegyada Dadwaynaha Denver) ayaa bixisa adeegyo kala duwan, oo ay ku jiraan deebaajiga, kirada bisha ugu horreysa, moorgeejka, ka saaridda, kirada, iyo kaalmada lacagta kaash ah, oo la siiyo kuwa uqalma ee ah dadka deggan Denver ee halista ugu jira inay guriyayntooda waayaan. Adeegyada Dadwaynaha Denver ayaa walibana ayaa ku taageerta degganayaasha:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Adeegyada caafimaad dhaqameedka/caafimaadka dhimireedka</li> <li>• Ilaha sida gaar ah loogu talagalay waayeelka iyo kuwa da'doodu soo dhow dahay</li> <li>• Ilaha cuntada, oo ay ku jirto Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Kaabka ah (SNAP) iyo u diritaanka kaydka cuntada</li> <li>• Adeegyada halyeeyada (veterans)/dadka ku soo jiray ciidamada iyo qoysaskooda</li> <li>• Ku xiritaannada shaqada iyo tababbaritaanka</li> <li>• U helitaanka adeegyada Dakhliga Haqab-Beelka Bulshada Kaabka Ah (SSI), ee loogu talagalay dadka naafada ah, dhaqan-celinta ama ka daaweynta daroogada ku jira, iyo kuwo ka bdan</li> </ul>	<p>Ka codso caawimada cuntada, lacagta kaashka ah, caafimaadka, iyo daryeelka carruurta bartan internetka <a href="https://colorado.gov/PEAK">Colorado.gov/PEAK</a></p> <p>Ka hel halakan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada gargaarka degdegga ah ee Adeegyada Dadwaynaha Denver (Denver Human Services) <a href="https://denvergov.org/HumanServices">Denvergov.org/HumanServices</a> ama wac 720-944-2032.</p> <p>Wac 720-944-4DHS (4347) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada iyo adeegyada Denver Human Services (adeegyada Dadwaynaha Denver).</p>
<p><b>MAXKAMADDA DEEGANKA (COUNTY) DENVER</b></p> <p>Maxkamadda Deegaanka (County) Denver ayaa siisaa ilo shaqsiyaadka raadinaya macluumaadka ku saabsan habraacyada maxkamadda iyo marin ugu helidda maxkamadda ee internetka.</p>	<p><a href="https://denvercountycourt.org/civil-arrimaha-in-denver">denvercountycourt.org/civil-arrimaha-in-denver</a></p> <p><a href="https://maxkamada.state.co.us/Courts/ Degmo / Custom.cfm? Degmo_Aqoonsi = 2&amp;Bogga ID = 856">maxkamada.state.co.us/Courts/ Degmo / Custom.cfm? Degmo_Aqoonsi = 2&amp;Bogga ID = 856</a></p>

<p><b>BARNAAMIJKA KA GARGAARKA TAMARTA DADKA DAKHLIGA-HOOSSEYA LEH (LEAP)</b></p> <p>LEAP waa barnaamij dowladda federaalku fuundayso oo ka caawisa reeraha uqalmitaanka leh iyadoo ka bixintaa qayb ka mid ah kharashaadka kuleylinta guriga. Codsiga ayaa qaadan kara 30 maalmood in la habsocodsiiyo laakiin way ka dhakhsa badan karaan xaaladaha degdegga ah ee ah sida ogeysiiska ka xiritaanka. Codsiyada ayaa la aqbalaa Noofamber-Abriil.</p> <p>Haddii ay ku haysato xaalad degdeg ah oo kuleylin ah, Energy Outreach Colorado ayaa laga yaabaa inay ku caawiyaan.</p>	<p>Ka wac khadka Energy Outreach Colorado qaybteeda HEAT HELP (oo la heli karo 24/7) telefoonka 866-431-8435.</p> <p><a href="http://Denvergov.org/LEAP">Denvergov.org/LEAP</a></p>
<p><b>COLORADO LEGAL SERVICES (ADEEGYADA SHARCIGA KOLORADO)</b></p> <p>Colorado Legal Services (Adeegyada Sharciga Kolorado) (CLS) ayaa siisa adeeyo sharci oo bilaash ah dhammaan noocyo kasta oo ka-saaridda deganaansheed shakhsiyaadka iyo qoysaska qanciya shuruudaha dakhliga. CLS sidoo kale siisa isla adeegyadan oo kale dadka waayeelka ah, iyadoon loo eegin dakhliga soo gala. CLS waxa laga yaabaa inay ku siiso talo sharci, iyo ka caawin buuxinta ka jawaabaha iyo dukumiintiyada kale ee sharciyeed ama ka wakiil ugu noqosho buuxda maxkamadda. Haddii aad tahay kireyste oo lagu siiyaya ogeysiin, ama aad heshay waraaqo maxkamad, ama dhibaato kaa haysato guriyayntaada, fadlan isla markaaba la xirii CLS.</p>	<p>303-837-1313</p> <p><a href="http://coloradolegalservices.org">coloradolegalservices.org</a></p>
<p><b>COLORADO AFFORDABLE LEGAL SERVICES (CALS) (ADEEGYADA SHARCIYEED EE LA AWOODI KARO EE KOLORADO EE KOLORADO)</b></p> <p>CALS ayaa waanisa, wakiil u noqta oo kala talisa kireeyaha iyo macaamiisha kireystayaasha ah arrimaha sharciga iyo arrimaha kale ee mulkiilaha/kireystaha. CALS ayaa kala talisa dhinacyada sida loo xereeyo, loo bilaabo iyo la iskaga difaaco dacwadaha maxkamada, oo ay kujirto dhexdhexaadinta marka lagu daro bixinta macluumaadka xalinta khilaafaadka iyo gudbinta ka caawinta sharciga.</p>	<p>303-996-0010</p> <p><a href="http://coloradoaffordablelegal.com">coloradoaffordablelegal.com</a></p>
<p><b>COVID-19 EVICTION DEFENSE PROJECT (MASHRUUCA DIFAACA KA-SAARIDDA GURIGA EE XILLIGA COVID-19)</b></p> <p>Mashruuca Difaaca Ka-Saaridda Guriga ee Xilliga COVID-19 waa mashruuc iskaashi, bulsho sharciyeedka. Hadafkeedu waa inay siiyaan macluumaad iyo taageero dadka reer Colorado ee aan awoodin inay iska bixiyaan kirada inta lagu jiro dhibaatada COVID-19.</p>	<p><a href="http://cedproject.org">cedproject.org</a></p>
<p><b>COLORADO COALITION FOR THE HOMELESS (ISBAHAYSIGA KOLORADO EE GURI-LA'AANTA)</b></p> <p>Magaalada iyo Deegaanka (County) Denver ayaa iskaashi la samayn doonta Colorado Coalition for the Homeless iyo National Guard si ay u taageeraan fursadaha qolka motelka/hotelka Denver oo dhan looguna talagalo dadka la kulma hoy-la'aatan inta lagu jiro dhibaatada COVID-19.</p>	<p>303-293-2217</p> <p><a href="http://coloradocoalition.org/covid-19">coloradocoalition.org/covid-19</a></p>
<p><b>XAFIISKA NIDAAMKA MADANIGA EE WAAXDA BOOLIISKA DENVER (SHERIFF)</b></p> <p>Qaybta Nidaamka Madaniga ee Waaxda Booliiska Denver (Sheriff) ayaa mas'uul ka ah adeegga geedi socodka madani, iibinta hanti maguurtada iyo ta shakhsiyadeed iyadoo la raacayo amarka maxkamadda, fulinta habraacyada ka-saaridda maxkamadda iyo siinta waxayabaha sharciga ee ay maxkamaddu amartay iyo wayaabo u dheer intaa.</p>	<p>720-865-9556</p> <p>201 W. Colfax Ave. First Floor Atrium</p> <p><a href="http://Denvergov.org/Sheriff">Denvergov.org/Sheriff</a></p>
<p><b>COLORADO HOUSING CONNECTS (ISKU XIRANKA GURIYAYNTA KOLORADO)</b></p> <p>Colorado Housing Connects ayaa bixiya macluumaad ku saabsan su'aalaha iyo waxyaabo tebashada kireystaha/milkiilaha.</p>	<p>1-844-926-6632</p> <p><a href="http://coloradohousingconnects.org">coloradohousingconnects.org</a></p>

**NEIGHBORHOOD EQUITY AND STABILIZATION INITIATIVE  
(NEST)(HINDISAH SA SINNAANTA IYO DEJINTA XAAFADAH)**

Hadafka NEST ayaa ah inay ka taageerto xaafadaha ay ka jiraan isbaddallada badani iyada kor u qaadda codkooda si ay u go'aansadaan mustaqbalka jaaliyaddooda iyadoo la awoodeeyo degganayaasha iyo meheradaha dhaqaalaha hooseeya iyo kuwa la iska fogeeyaba. Aragtideena: Bulshooyin firfircoon, hal abuur leh, oo isku xiran oo leh dhaqaale fursado hoy lagu sameysto, shaqo lagu helo, oo mustaqbalna lagu dhiso. NEST:

- Ayaa sameysa gacan u fidin loogu wargaliyo loona taageero milkiilayaasha guryaha ya haysato canshuurta milkiiyadda ee lala daahay, deyn u haysasho, iyo kaqaadista guryuhu
- Waxay taageertaa abaabulka bulshada aasaasiga ah
- Waxay siisaa fuundayn ururrada xaafadaha iyo bulshada ee u fidiya barnaamijyada iyo adeegyada shaqsiyaadka dakhligoodu hooseeyo-illaa-dhexdhexaadka ah.

[Denvergov.org/content/denvergov/en/denver-office-of-economic-development/housing-neighborhoods.html](https://denvergov.org/content/denvergov/en/denver-office-of-economic-development/housing-neighborhoods.html)

**DENVER REGIONAL COUNCIL OF GOVERNMENTS (DRCOG) (GOLAHA  
DAWLADO GOBOLEEDYADA DENVER (DRCOG) AREA AGENCY ON  
AGING AND NETWORK OF CARE (WAKAALADDA AAGGA EE  
WAAYELOWGA IYO ISKU XIRKA DARYEELKA)**

DRCOG waxa kale oo ay samayasay websaydh dhammaystiran oo salka ku haysa bulshada si loogu bixiyo macluumaadka hadda jira ee ku saabsan adeegyada, oo ay ku jiraan ka caawinta sharciyeed iyo taakuleynta guriyaynta, oo ay heli karaan dadka waayeelka ah iyo daryeelayaashoodu.

[drcog.org/programs/area-agency-aging](https://drcog.org/programs/area-agency-aging)

Lambarka ugu muhiimsan 303-480-6700

Long-Term Care Ombudsman  
(Ombudsmanka Daryeelka  
Muddada-Dheer): 303-480-6734

Ilaha ka-hortagga ka-saaridda ee heer-gobol oo dheeri ah ayaa ku yaal [cdola.colorado.gov/housing-covid19-eviction](https://cdola.colorado.gov/housing-covid19-eviction).